Erayga iyo Maanta Somtwt 0317

Diyaargarayska

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa ee Erayga iyo Maanta, oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **'Diyaargarayska'.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta. Waxaana waxbariddan isku soo dubbariday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiibayaal marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **'Diyaargarayska'**oo aynu halkan idiinku lafa-guri doonno aad maqli doontaan. Haatanse aynu wada dhegaysanno qasiiddadan macaan ee ay noo qaadayaan hobollo masiixiyiin ah oo Soomaali ah.

SONG: EEBBE WAA RAXIIM

Markii aad samaynyso wax qiima leh ama ahmiyaddiisu sarrayso waxay qaadanaysaa wakhti lagu diyaariyo. Noqon maysid cunto kariye magac leh haddii aad cunto isku darto oo aad dabka saarto. Noqon maysid orod-yahan haddaad hal maalin adigoo jirkaagu dhisnayn aad oroddo 4 daqiiqo halkii mayl. Waxay tabanaysaa inaad noqoto orodyahan dadaal badan, iyo inaad maskaxda ka shaqaysiiso, adadag, iyo diyaargarow, ka hor intadan ku guulaysanin ujeedka aad layliga u samaynayso. Mide baase u baahan tahay inaad ka ogaato doodaha socda oo culimada Saynisku ay ku doodayaan si ay ku adkeeyaan fikirradooda iyagoo

leh noloshu kama’ bay ku bilaabatay. Balse muran iyo dood geli mayso in la yiraahdo kiimiko dunida timid ayaa sabab u ah in noloshu aasaasanto. Taasi waa naasnimo aan la waafajin karin xitaa cilmiga iyo fikirka toosan ee aadanaha. Waase hannaan diin oo kale ah in la aamino in wax si kama’ah u dhacaan iyadoo aan la sii diyaargaraynin, la abaabulin, oo aan la samaynin wax qorshe ah. Waxaase nacasnimo ah welibana in lagu doodo in noloshu ay kama’ku timid.

Waa hagaage, adiga dhegaysanaya barnaamijka aynu tusaale ahaan ka dhigno in nolosha Ilaah sameeyey, waayo iyada un iskama iman karto. Qorshaha nabaadiinadeenana waxay qaadanaysaa in la sii diyaariyo. Waxaan aad u fiiriyaa markaan akhrinayo kitaabka sida Ilaaha Aabbaha ah iyadoo aan la garan uu wax u samaynayo, wixiina ay dhacayaan ama la arkayo.

Mararka qaar qaybaha cajiibka ah ee Injiilka waa qaybaha mucjisooyinka degdegta ku yimaada marka Ciise uu qof indhala’bogsiiyo, amase uu qof dhintay soo sarakiciyo. Waxaase ka sii yaab badan waxaas oo dhan sida Ciise qudhiisa dhimashada looga sarakiciy.

Waxyaalo kale ayaa dhacay si qorshahan sarakicidda loo sii diyaargareeyo. Haddii aad eegto bilowga Injiilka sida Luukos u qoray cutubka 1aad, waxaad arkaysaa, haddaad u kuurgasho, waxyaalo badan oo Ilaaha Aabbaha ah diyaarinayo si sarakicidda loo meel mariyo. Waa wax fajiciso ah in marka hore Yooxanaa Baabtiisuhu bilaabo shaqadiisa, dadkana uu wax ka baray toobadkeenka.

Dhacdadaasina ahmiyad bay leedahay waayo maahan intaad meel fariisato oo gacmaha laadlaadiso inaad tiraahdo Ilaah baan sugayaa, oo ay kula noqoto inaan loo baahnayn waxqabad, sidaad tahay mid kaamil ah oo Ilaah qaabili karo. Taasi wax toosan maahan, waxaana marka hore loo baahan yahay toobadkeen iyo inaan dembiyadeenna qiranno inaynaan Ilaah u iman.

Maahan inaan la fadhinno dembigeenna iyo inkiraaddeenna iyo qima-darideenna haddana ay inala noqoto in wax waliba hagaagayaan iyo in Ilaah inoo aqbalayo sida inaanay ahayn inaan dembiyadeenna ka soo noqonno. Maya sidaas maaha, xaqiiqatan farriintii Yooxanaa Baabtiisaha waxay ahayd in loo baahan yahay toobadkeen. Xaqiiqdii, wuxuu isticmaalay tusmadii kitaabka Axdigii Hore, sida ku qoran Injiilka sida Luukos u qoray 3:4-5 oo leh:

"Waa codka kan cidlada kaga qaylinaya, Jidka Rabbiga hagaajiya, Waddooyinkiisa toosiya. Dooxo walba waa la buuxin doonaa, Qar iyo buur walbana waa la gaabin doonaa, Wixii qalloocanna waa la toosin doonaa, Jidadka xunxunna waa la simi doonaa."

Farriintani waxay tilmaamaysaa sida loogu baahan yahay in la diyaariyo jidka lagu gaaro toobadda. Ishacyasah ayaa isna wuxuu leeyahay, sida ku qoran 40:5, oo leh: **"Oo waxaa la muujin doonaa ammaanta Rabbiga, uunka oo dhammuna way wada arki doonaan, waayo, afkii Rabbiga ayaa saas ku hadlay."** Yooxanaana wuxuu dadka ugu yeeray toobadkeen, askar xitaa way u yimaadeen, oo wuxuu ku yiri,

"Dadka ha khasbinina, balse raalli ku ahaada mushaarka laydin siiyo." Waxaa jira wax ay tahay in dadku sameeyo si ay dembigooda uga soo leexdaan. Bal u fiirso qaddar daqiiqado ah si aad ku ogaato in Masiixu kuu yeeray iyo in kale. Haddii uu kuu yeeray oo doonayso inaad aqbasho, waxaad u baahan tahay inaad dembiyadaada ka toobadkeento.

Ma tihid qof daahir ah oo toosan oo istaahila Masiixa ilaa aad qirato inaad tahay dembiile, oo aad garato inaadan kaamil ahayn, oo aad u baahan tahay bixiye. Tan kowaad ee aan jeclaan lahaa inaad samayso waa inaad qirato dembigaaga oo aad ogaato inaad u baahan tahay Ciise Masiix waayo waxaad tahay dembiile. Yooxanaa markii uu wax fiiriyey, sida muuqata, wuxuu arkay dhaqanka bulshadii maalintaas, wuxuuna arkay inay jireen dad badan oo dembi ku jira, iyo kuwo Ilaah u gefaya, wuxuuna iyaga oo dhan ugu baaqay inay toobadkeenaan.

Arrinkaasina waa waxa wacdiyayaasha Injiilka ay ilaa iyo maanta sameeyaan, waxay dadka ugu baaqaan inay dembiga ka toobadkeenaan si ay Masiixa imaanshihiisa isugu diyaariyaan. Maanta, wakhti dheer baa ka soo wareegay markii Ciise dunida isaga tegay. Haatan waxaa la soo gaaray wakhtiga kiniisadda, iyo wakhtiga Ruuxa Qoduuska ah uu ina fahamsiinayo inaan Masiixa raacno oo qiranno dembigeenna si layna siiyo saamaxaadda Ilaah oo aan ugu noolaanno rumaysadka Ciise masiix, iyo inaan noloshii hore beddelno, oo ku noolaanno nolol Ilaah ka farxisa.

Wakhtigeennan waxaannu dhowraynaa imaanshaha labaad ee Ciise Masiix. Waxay kaloo tanina noqonaysaa wakhtiga diyaargarayska. Maahan inaan iska fariisanno iyadoo aynaan waxba qabanaynin, kamana dhigna in marba haddaan ku kalsoonaanay hal mar in xiriirkeennu istaago. Mana ahan inaan iloowno wixii aan baranay oo lacag iyo tabac adduun ku mashquulno iyo inaan magac iyo sharaf raadinno.

Taa la dooni maayo, waase in qofka masiixiga ah uu ku koro u dhowaanshaha Sayid Ciise Masiix. Ilaah wuxuu inoo diyaarinayaa imaanshaha labaad ee Masiixa, oo dhaqdhaqaaq baa jira, iyo diyaarin ku socota macaamilka dunida. Bal aan tusaale idinka siiyo waxa Ilaah samaynayey ka hor intaanu Masiixu imanin dunida markii kowaad. Yooxanaa Baabtiisaha ayaa ka horreeyye Masiixa wuxuuna dadka ogaysiiyey imaanshaha Masiixa iyo in la toobadkeeno.

Waxaan arkaynaa haddaba waxyaalaha Ilaah halkan ku sii diyaariyey ee is-xigxigay, sida dhalashadii Yooxanaa Baabtiisaha oo ku qoran Injiilka sida Luukos u qoray. Cutubka kowaad wuxuu ka hadlayaa aabihiis Sekeryaah oo shaqo ka wada Macbudka iyo malaa’igta Ilaah oo isaga u muuqatay oo ogaysiinaysa inuu wiil dhali doono, magaciisna loo bixin doono Yooxanaa.

Waxaa kaloo ku qoran sidii Sekaryaah uga shakiyey xaalka, oo uu weliba su’aalo uga keenay, waxaana Sekeryaah loo qabtay afka ilaa uu Yooxanaa Baabtiisuhu dhasho. Markii Yooxanaa dhashay, ayaan arkaynaa in malaa’igtu ay u muuqatay Maryama

oo ogeysiisay inay wiil dhali doonto. Waxaa u dhexaysay dhalashadii Yooxanaa iyo dhalashadii Ciise, lix bilood. Ilaah wuxuu sii diyaarinayey hawshan sannado badan. Yooxanaa waalidkiis, Zekeryaah iyo Elisabet waxay ahaayeen kuwo aamin ah iyo qoys cibaado leh. Yooxanaa kama dhalan dad aan rumaysad lahayn oo reera adduun ah, balse wuxuu ka dhashay qoys Ilaah aaminsan oo cibaado leh.

Elizabet waxay ahaan jirtay ma-dhalays, oo kitaabka Axdigii Hore waxaa ku qoran dumar ma dhalys ahaa oo si mucjiso ah ilmo ku dhalay si dadka loogu muujiyo aaminnimada Ilaah iyo inuusan ka weecan qorshihiisa badbaadada ee socda kaasoo Ilaah ballan qaaday. Wuxuuna ahaa in Ibraahim dunida oo dhan lagu barakadayn doono. Wakhtigaasina waa marka uu yimaado Masiixa, mar walibana qorshaha waxaa qabsanayey caqabado, oo dumarkii baan ilmo dhalaynin.

Ilaahna si mucjiso ah ayuu carruur ku siinayaa iyaga si qorshihiisa uu u socdo. Isla sidaa oo kale ayaa Ilaah Sekeryaah iyo Elisabet wuxuu siiyey wiil. Xaqiiqdii, wiilkan ayey Ilaah ka baryayeen sida ku qoran Injiilka sida Luukos u qoray cutubka 1aad, Ilaahna wuxuu aqbalay salaaddoodii. Yooxanaa Baabtiisaha waxaa loogu durraamay inuu u adeego Ilaah.

Kanina waa nidaam kale oo Ilaah u sii diyaariyey imaanshaha Ciise. Sida muuqata, Ilaah arrin soo boodda ah ma keeno, oo wax kama’ ku yimaada ma jiraan marka laga reebo mucjisooyinka. Waxaan doonayaa inaad bal xaalkan u fiiirsato oo la

barbar-dhigto noloshaada. Ilaah qorshe iyo ujeeddo ayuu u hayaa noloshaada. Waase inaad u timaaddo Sayid Ciise Masiix, oo xiriir sokeeye la samaysato. Dabadeedna Ilaah qorshe la hubo ayuu kuu hayaa iyo ujeeddo wanaagsan oo noloshaadu ay yeelato. Wuxuuna wax waliba kuu sii diyaariyey intaadan dhalan ka hor, wuxuuna isku xirayey arimahan kala duwan wakhti dheer si uu ugu soo xiro noloshaada.

Dabadeedna aad ugu timaaddo Ciise Masiix oo ugu adeegto. Noloshaadu ujeeddo iyo macne ayey leedahay, waxayna ku joogta jahada Sayid Ciise Masiix kaa jiro. Waxaa jooga maanta dad ku nool nolol wareer iyo rajo la’aan badan, waxay rumaysan yihiin beenta leh, noloshu si lama filaan ah ayey ku timid iyadoo aan jid iyo jaha lahayn. Ha rumaysan waxaas! Nololi kuma timaaddo qasad la’aan, isla sida adiguba aadan u ordaynin 4 daqiiqo halkii mayl qasad la’aan iyo macna-darro. Markaasina waxaan kuu sheegayaa in Ilaah wax waliba u sii diyaariyey wanaaggaaga iyo in imaanshaha Masiixana la sii diyaariyey, la sii ogaa, oo uu yimid oo markuu yimidna sii waday qorshihii Ilaah. Waxaana loo diyaariyey in la saaro iskutallaabta si uu adiga kuugu dhinto waayo isagu waa Wiilkii Ilaah. Wuxuu leeyahay awood uu kaga sarakaco dhimashada oo kaga adkaado Shayddaanka, dembiga iyo dhimashada.

Fadlan garo in noloshaada ay macne iyo ujeeddo leedahay, waxayna leedahay qorshe aad ugu imanayso Ciise oo aad isugu diyaarinayso inaad noloshaada ugu khidmayso Ilaah. Fadlan haddaba isku dhiib

danta iyo qorshada Masiixa. Waxaad yeelan doontaan mudnaan, awood, qiimi, farxad iyo raja la hobo oo ah in dembiyadaadii la cafiyey iyo in noloshaadu leedahay ujeeddo. Fadlan, sii noloshaada Sayid Ciise Masiix. U imow isaga oo raadso farxadda iyo xoogga aad ku ogaanayso inaad leedahay ujeeddo iyo qorsh ah in Ilaah adiga kuu diyaariyey mustaqbal aad u weyn.

SONG: EEBBE WAA RAXIIM

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe saacadahan oo kale isla idaacaddan. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan Telephone number 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna **www.twr360.org.** Farriinta waxaad ka soo hormarinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah **0707032060**